



Ridgewater College

Codsiga Kaamka Scrubs (Scrubs Camp Application)

Juunyo 10-12, 2024

Xilliga isdiwaangelinta kama dambaysta ah: Juunyo 5, 2024
U dir codsiyada oo dhamaystiran: kelly.mccluremork@ridgewater.edu

Macluumaadka Ardayga	
Magaca Ardayga:	Magaca Waalidka/Masuulka Sharciga ah:
Magaca la doorbidayo:	
Taariikhda Dhalashada Ardayga:	Macluumaadka la Xiriiritaanka Waalidka/Masuulka Sharci ah
Da'da:	Taleefanka Shaqada:
Jinsiga:	Taleefanka gacanta:
Fasalka dayrtan uu gelaya (sanad dugsiyeedka 2024-2025):	Ma kuu soo diri karnaa fariin qoraal ah (ma soo direyno spam ama macluumaad xayaysiis ah. Waxaan soo direynaa oo kaliya su'aalaha/xaaladaha la xiriira Kaamka Scrubs):
Dugsigee beey dhigtaan?	Eemayl:
Cinwaanka guriga	Macluumaadka Xiriirka Degdegga ah (haddii waalidka ama mas'uuliyiinta aan la waayo/aan la heli karin)
Jidka:	Magaca:
Magaalada:	Taleefanka:
Zip kood:	
Faafinta Warbaahinta	
<p>Kulliyadda Ridgewater waxay diiwaangelin doontaa 2024 Kaamka Scrubs inta lagu guda jiro casharka iyada oo la isticmaalayo maqal, muuqaal, qoraal ahaan, iyo/ama sawir qaadis. Marka aan saxiixo hoos, waxaan u fasaxayaa Kulliyada Ridgewater in ay isticmaasho maqal, muuqaal, qoraal ahaan iyo/ama sawirada la helay intii lagu jiray kaamka taas oo laga yaabo inay ka soo muuqdaan ilmahayga oo sawirkooda la isticmaalayo muqaal ahaan, xayaysiin, daabacaad, ama ujeedo kale oo sharci ah.</p>	
_____	_____
<i>Saxeexa Waalidka ama Masuulka Sharciga ah</i>	<i>Taariikhda</i>
<input type="checkbox"/> Maya mahadsanid, waan diiday.	

****Fadlan buuxi bogga 2aad ee dukumintigaan****

Xasaasiyadda cuntada

Waxaan dadka siin doonaa ardayda qado lacag la'aan maalmaha Isniinta, Talaadada, iyo Arbacada. Marka la qorsheynayo cuntada, miyuu ardaygaagu qabaa wax xasaasiyad cunto ah oo aan u baahannahay in aan tixgelinno?

Miyuu ardaygaagu wataa epi-pen? Haa Maya

Gaadiidka

Kulliyadda Ridgewater ma awoodo in ay u soo dirto ardayda gaadiidka Kaambada Scrubs, mas'uuliyadda gaadiidka qoyska ayey saaran tahay. Sidee buu ardaygaagu ku iman doonaa kaamka maalin kasta?

- Iyaga ayaa gaari soo kaxayn doona
- Aniga (waalidka ah) ayaa keeni doona
- Iyagu waxay iskood u imaan doona kaamka, laakiin gaari ma wadan doonaan (socod ahaan, baska KAAT, baaskiil soo wadanaya, iwm)
- Waxay gaari la soo raaci doonaan arday kale oo ku jira kaamka Scrubs
Magaca ardayga

Ma u ogolaaneysaa qof kale oo weyn in uu soo qaado ardaygaaga haddii lacala gaadiid kale loo baahdo in la diyaariyo? Haa Maya

Hadday haa tahay, fadlan hoos ku tix liiska dadka waaweyn iyo lambaradooda telefoonka:

Macluumaad kale oo Muhiimka ah oo Ardayga ku saabsan

Fadlan qor wixii macluumaad dheeraad ah oo aad rabto in aan ka ogaano ardaygaaga:

Ka Dhaafista Mas'uuliyadda Looga Baahan Yahay *Waxaa laga rabaa dhammaan ardayda ka qayb-qaadanaysa*

Fadlan dib u eeg ka dhaafitaanka mas'uuliyadda (bogagga 3 & 4 ee codsigan), saxiix oo taariikhda ku qor, oo soo raacsii codsigaaga aad buxisay. Ardayda aan haysanin ka dhaafitaan dhammaystiran oo diiwaan gashan ma awoodi doonaan in ay ka qaybqaataan Kaamka Scrubs.

Saxiixa Waalidka/Masuulka Sharciga ah

Waxaan qirayaa in ardaygaygu uu haysto ogolaansho uu uga qaybqaadanayo Kaamka Scrubs ee Ridgewater College (Kuliyada Ridgewater College's Scrubs Camp)

Saxiixa Waalidka ama Masuulka Sharciga ah

Taariikhda

Kaamka Scrubs ee Kuliyadda Ridgewater College (Ridgewater College Scrubs Camp)

Kanbaska Willmar

Ka Dhaafista Masuuliyadda, Magdhowga, iyo Siideynta Xogta Caafimaadka

Waa in uu u saxiixo waalidka ama masuul kale ee sharciga ah ee ka qaybgale kasta ee Kaamka Scrubs ee Kuliyadda Ridgewater.

SI TAXADAR LEH U AKHRISO INTAADAN SAXIIXIN

Waxaan ogolaaday inaan ka diiwaan geliyo ilmahayga _____
Kuliyadda Ridgewater Kaamka Scrubs ee ay qabato Kuliyada Ridgewater, Willmar, MN ("Kuliyad"). Ka qayb galka ilmahayga ee barnaamijka waa ikhtiyaari.

Kaamka Scrubs ee Kuliyada Ridgewater waxay ka kooban tahay sahamin shaqooyin iyo waxqabadyo kobcin oo loogu talagalay shaqooyinka daryeelka caafimaadka ee carruurta geli doonta fasallada 9aad-12aad ee sannad dugsiyeedka 2024-2025. Carruurta waxay wax ka baran doonaan waxyaalo ku saabsan waxbarashada daryeelka caafimaadka ee kala duwan ee la bixiyo iyaga oo gacanta shaqada laga qabanyo, casharo howshii la qabanayo. Waan ogsoonahay in ay jiri karaan khataro ku wajahan ilmahayga marka uu ka qaybqaadanayo hawlaha kaamka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, dhaawac jirka ah ama hanti burburta. Waan fahamsanahay oo waan aqbalay dhammaan khataraha la xiriira kaamka.

Iyada oo la tixgalinayo heshiiska Kuliyada si loogu oggolaado ilmahayga in uu ka qaybqaato barnaamijkan, helitaanka iyo ku filnaanta arinta halkan lagu cayimay, waxaan oggolahay waxyaalaha soo socota:

1. Aniga iyo ilmahaygu waanu ka wada hadalnay xeerarka iyo shuruucda badbaadada. Ilmahaygu wuxuu oggolaaday in uu u hoggaansamo xeerarka badbaadada ee uu dejiyay macalinka koorsada dhigaya. Ku guuldareysiga in sidaas la sameeyo waxay ilmahayga ka saaraysaa ka sii qaybgalka waxbashada.
2. Aniga, shaqsi ahaan, iyo anigoo ku hadlaya magaca dhaxal sugaheyga, ku xigeenada, xil sugaheyga iyo wakiillada gaarka ah, waxaan halkan ku sii daynayaa oo aan waligeed ka saarayaa Kuliyada, Gobolka Minnesota, iyo shaqaalaha, wakiiladeeda, saraakiisha, wakiiladeena iyo wakiiladeeda (awoodooda rasmiga ah iyo shaqsi ahaaneedba) ("Siideynta") ee kasta iyo dhammaan mas'uuliyadda wax kasta iyo dhammaan waxyeellada, khasaaraha ama dhaawacyada (ay ku jirto dhimashada) ee aniga ama ilmahaygu naga soo gaarto qof ama hanti ama labadaba, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn wax sheegasho, dalabaad, ficilo, sababaha ficilka keenay, xukunnada, khasaaraha, kharashyada iyo lacag baxday, oo ay ku jiraan khidmadaha qareenka, kuwaas oo ka dhasha, ka yimaada, ama dhaca inta lagu jiro, ama ku xiran si kastaba ha ahaatee ka qaybgalka ilmahayga ee Barnaamijka Kaamka Scrubs ha ahaato mid ay sababtay dayacaadda Siidaynta ama haddii kale; marka laga reebo midda ah wax ka dhalashay dayacaad weyn iyo/ama anshax-xumo ka timid xog Siideynta.
3. Aniga, shaqsi ahaan, iyo anigoo ku hadlaya magaca dhaxal sugaheyga, ku xigeenada, xil sugaheyga iyo wakiillada gaarka ah, waxaan halkaan ku heshiiyey in aan magdhaw, difaaco oo

aanan u haysan wax dhib ah Kulliyada, Kulliyadaha Gobolka Minnesota & Jaamacadaha, iyo Gobolka Minnesota iyo shaqaalaheeda, wakiiladeeda, saraakiisha, wakiillada iyo wakiillada (oo ku shaqeynaya awoodahooda rasmiga ah iyo kuwa shakhsi ahaaneed) ee dhammaan mas'uuliyadda, khasaaraha, dhaawaca ama kharashka, oo ay ku jiraan khidmadaha qareenka, in iyaga ama mid ka mid ah ay galaan ama sii wadaan natiijada sheegasho kasta, dalabaad, ficilo, sababaha ficil, waxyeelada, xukunada, kharashaadka ama kharashyada, oo ay ku jiraan khidmadaha qareenka, ee ka soo baxa, ee dhaca/yimaada inta lagu jiro, ama si kasta loola xiriirinaayo ka qaybgalka ilmahayga ee Barnaamijka Kaamka Scrubs.

4. Waxaan halkaan ku oggolaaday in aan u oggolaado ilmahayga in uu helo daawaynta laga yaabo in loo arko in ay u habboon tahay haddii uu yimaado dhaawac, shil ama jirro inta lagu jiro Kaamka Scrubs. Waxaan halkaan ku qirayaa waajibka iga saaran in aan bixiyo wixii daawayn ah ee macquul ah oo lagama maarmaan ah oo laga yaabo in ay ilmahayga siiyaan xirfadlayaal iyo xarumo daryeel caafimaad oo shati haysta.

Waxaan ogolahay in heshiiskan lagu saleeyo sharciyada Gobolka Minnesota, U.S.A.; iyo in haddii qayb ka mid ah halkan lagu helo in aysan ansax ahayn, haraaga halkan soo hary, si kastaba ha ahaatee, wuxuu ku sii socon doonaa si buuxda oo sharci ah oo saameynaya arinta. Waxaan oggolaaday in heshiiskan si weyn eray eray loo dhaqan geliyo si loo bixiyo sii-deynta, magdhawga, iyo ka-dhaafka ilaa xadka ugu badan ee la oggol yahay marka loo eego sharciyada ay khuseyso. Makra aan saxiixa dukumeentigan waxaan halkan ku qirayaa in aan akhriyay dukumeentigan oo dhan, oo aan fahmay shuruudihiisa, oo aan ahay ugu yaraan siddeed iyo toban (18) sano jir, oo aan ahay waalidka ama masuulka kale ee sharciga ah ee qofka ka qaybqaataha ah ee lagu magacaabay kor. Waxaan fahamsanahay in marka aan saxiixo heshiiskan, aan ka tanaasulayo xuquuqaha sharciga ah ee aniga ama ilmahaygu lahaa ama haddii kale uu yeelan karo, iyo in aan saxiixay heshiiskan Waiver, Release and Indemnification Agreement (Heshiska dhaafitaanka, Siidaynta iyo magdhawga) si ogaansho iyo ikhtiyaari ah.

Saxiixa waalidka ama masuulka kale ee sharciga ah ee ka qaybqaataha

Taariikhda

Magaca Daabac